

**DUUFAANAHA BA'AN**

Iyadoo ay duufaan oo dhani khatar tahay, haddana Adeegga Cimilada ee Qaranka (National Weather Service, NWS) waxay duufaan ba'an ku qeexaan midda:

- Midda samaysa taluulshe wada jira oo dhan afar rubac oo inji bed ahaan.
- Lehna dabaylo 58 mayl saacaddii am aka badan ku socda.
- Samaysa tornaado.

Duufaanuhu waxay u dhici karaan si keli keli ah, xayn, ama si isku toosan. Qaar ka mid ah cimilada ugu ba'ani waxay dhacdaa marka ay hal duufaan ihi hal meel ah waqti dheer hayso.

Kataraha ku tacalluqa duufaanaha waxaa ka mid ah:

- Wiriq (jac). Inkastoo inta badan dhibbanayaasha wiriqdu ay ka kacaan, 75 ilaa 100 qof ayay Maraykanka sanadkii biriqi ku dishaa—in ka badan inta ay dilaan tornaadooyinka. Biriqdu waxaa kale oo ay sababtaa khasaare ku siman 5 bilyan oo dollar sanadkii dalkan Maraykanka.
- Shiid-baraf. Shiid-barafku wuxuu ka yaraan karaa xagtin wuxuuna u weynaan karaa sida kubbadda khafiifka ah, waxaanu burbur u geysan karaa gaariyaasha, oogoooyinka quraaradaha ah, saqafyada, geedaha abuuran iyo dalaggaba. Hebedka (eeyaha iwm) iyo xoolaha ayaa si gaar ah halis ugu jira shiid-barafka.
- Dabeel-hoosaadda iyo dabaylaha xarriiga toosan. Duufaanaha waxay samayn karaan dabaylo u sarreeya ilaa 150 mayl saacaddii, oo awooda in ay baabuurta, minibasyada, iyo gaariyaasha waaweyn geddiyaan.
- Daadadka xawliga ku socda. Roob culus oo duufaani ay sababtay wuxuu keeni karaa daadad xawli ah.
- Tornaadooyin. Duufaanaha qaar baa abuura tornaadooyin.

Adeegga Cimilada Qaranka (The National Weather Service: NWS) Xaruntiisa Saadaalinta Duufaanta ayaa soo saara ilaalooyin iyo digniino cimilada khatarta ah oo ay duufaanuhu ku jiraan ku saabsan.

## DUUFAANAHA BA'AN (WELI SOCDA)

### BIRIQDA (JAC)

Biriqdu waxay badiyaa ku dhacdaa meelaha bannaanka ka ah roobabka waaweyn, waxaanay ka dhici kartaa fogaan 10 mayl dhan oo meesha roobsanaysa ah.

Waxaad khatar ugu jirtaa biriq haddii aad maqli kartid onkodka. Runtii, in ka badan 50 boqolkiiba oo dhimashada biriqda ay keento ah ayaa dhaca ka dib markay duufaanto feerto.

Kuwani waa tallaabooyinka muhiimka u ah u diyaarsanaanta duufaanaaha:

- Fahamsanow halista. Duufaanaaha ba'ani waxay dhici karaan sanadka oo dhan saacad kasta. Waqti ku bixi barashada halista duufaanaaha ee aaggaaga—iyadoo ay ku jirto cimilada iyo inta ay badanaa duufaan badani wehliyaan tornaadoyin.
- Baro iska dhigidda bartilmaameed yar. Baro hoos u kuududsiiga dhulka, adigoo samaynaya bartilmaameedka ugu yare e suuraggalka ah yaraynaya taabashada dhulka.
- U dhug lahow digniinaha. Isticmaal raadiyaha cimilada ee NOAA oo leh meelo u go'an in laga dhegaysto raadiyaha ama telefishanka maxalliga ah ee wada baahinta EAS. Baro nidaamka digniineed ee bulshada abidna digniin hayska dhegamarin.

Waa in aad iska ilaalisaa:

- Ilaaha biyaha. Haddaad doon wadatid ama dabbaalanaysis, markiiba dhulka tag. Ka dheerow meelaha biyaha iyo ciidda qoyan. Haddaad guri ku jirto, ka fogow biyaha ka socda tuubbada. Korantada jacda ayaa soo raaci karta habka biyaha wada.
- Tilifoonka. Korantada jacda ayaa sidoo kale soo raaci karta xagaha tilifoonka.
- Bannaanka. Dhisme kakan ayaa ah meesha ugu nabdoon ee la galo xilliga duufaanaaha ba'an. Ka dheerow aagagga aan la ilaalinin iyo gabbaadyada aan la ilaalinin eek u yaal aagagga furan.

Waa inaad demisaa eer kudheeshinka iyo korantooyinka kaleba. Korantada ka timaadda biriqda ayaa qolka ka soo geli karta qalabyadaa. Sidoo kale, deminta iyo ka siibidda fiilada ee qalabka xirxiran wuxuu baabbi'inayaa halista ka iman karta burburka isla-kicidda la socon kara marka ay biriqdu ku dhacdo meel hoyga u dhaw.

### DUUFAANAHA BA'AN (WELI SOCDA)

Waa in aad sidoo kale qaaddid tallaabooyin aad maaladdaada ku dhawranaysid, oo ay ka mid tahay tallaabooyinkan oo xitaa dabaylaha sare lagu dabbakho:

- Faraajiinta bannaanka gudaha soo geli ama ka adkee in ay dabayshu qaaddo. Waxyaabaha yaryar ayaa noqon kara halgaad wax disha markay kacaan dabaylaha sare ee xooggan.
- Ka jar laamaha laallaada ama engegay geedaha iyo geed-gaabka. Si tabaysan u jar laamaha si aad dabaysha ugu oggolaato in ay gudubto. Dabaylaha xooggan waxay jebin karaan laamaha daciifsan waxayna ku qaadi karaan xawli sarreeya, oo markaa ku sababi karaan hanti burburta ama dhaawac dadka iyo xoolaha ku yimaada.

Haddii ay bulshadaadu halis ugu jirto duufaanaaha ba'an, ama qaybo bulshada uhu ay si gaar ah u dayacan yihiin, oo aad meelaha ku nooshahay, waxaa la soo jeedinayaa in aad iibsato sabaradda biriqda.

Haddii ay duufaan ba'ani kugu hesho bannaanka, waa in aad:

- Ka fogaataa ilaha biyaha. Ka dhex-bax beraagaha ama laagaha. Ka tag xeebta.
- Gabbaad u doono meel sal adag oo deggan oo xiranna. Ka fogow gabbaadyada aan la dhawrin, sida meelaha xeeqada lagu cayaaro iyo garoonka kubbadda baysbool. Xusuusnow in gabbaadyada ku go'doonsan meelaha sida kale u furan ay bartilmaameed u yihiin biriqda. Gabbaadyada ku meel gaarka ah, sida waab-duureedyada waxay u badan tahay in ay bidaan marka ay dabayl xooggani dhacdo shied-barafkana kaama celin karaan.
- Haddii aanay jirin gabbaadyo joogto ah oo aad gaarto, gaari gabbaad ka dhigo. Daaqadaha oo dhan ha xirraadeen hana taaban walax bir ah. Haddaad kaynta joogto, hel meel ay ku gedfan yihiin geed-hoosaadyo (maya geed keliya oo dheer oo bannaan ku yaal). Tallaabbo bedbaado oo kama dambays ah awgeed, aad meelaha hoos u sheeban, oo ka fog geedaha, baallooyinka, iyo aaladaha birta ah. (Ka fogow meelaha daadku uu saamayn karo.) Hoos u kadalloobso gacmahaagana saar jilbaha iyadoo uu madaxuna labada jilib dhexdooda ku jiro. Iska dhig bartilmaameed kan ugu yar. Ha seexan dhulka adigoo is fidinaya.
- Ka fogow sabaradaha biriqda ee dabiiciga ah, sida ul-xeegeedka, birmallayda, iyo qalabka duur-degidda. Biriqda way soo jiitaan alaabahaas oo dhan.

**[THIS PAGE WAS LEFT INTENTIONALLY BLANK.]**